# Qoraal ihtimaansiin u ah Koriyeyaasha

Markaad la wareegtid fulinta Masuuliyadda Waalidnimadda waxaa buuxinaysaa waajibaadka Muwaadinka saaran. Waxaad la wareegaysaa shaqo iskaa wax u qabso ah, kaa soo aad u qabanaysid si damiir fiican leh iyo masuuliyad leh kaa soo si gaar ah u xiisaynayo fulinta danaha ilmaha masuulka laga yahay.

Sidda xeerka ku saabsan masuuliyadda Waalidnimadda ee ku qoran buuga xeerka Rayadka (§§ 1773 illaa 1808). Xuquuqda iyo waajibaadka saaran qofka Masuulka ka ah ilmaha waa daryeelis, lagu qeexay sidda §§ 1631a illaa 1632 ee xeerka buuga Madaniga (§ 1795 Buuga xeerka Madaniga). Waxaa lagula talinayaa inuu shuruucda darso ama barto.

Waxa soo socda ayaa ah kuwa in si gaar ah loo qadariyo mudan:

a) Waxaad haysataa Xuquuqda iyo Waajibaadka qofka iyo raasumaalka ilmaha aad daryeelaysid iyo isagii oo aad wakiil ka tahay. Waxaadan wakiil oga noqon karin Hawlaha waxa Sharciga ah iyo dacwooyinka adiga kugu saabsan – ha ahaado mid magacaaga ah ama qof seddexaad oo aad wakiil ka tahay – sidda Xaaskaagii, qof si diiwaangalin ah aad nolosha u wadaagtaan ama qof aad ehel sokeeye tihiin ama arimo ku lug leh Xannaanaynta.

   I. **Xannaanaynta ama korinta qofka** waxaa ka mid ah xuquuqda iyo waajibaadka ilmaha ku barbaarisid, waana inaad ku kormeertid iyo meesha uu Joogayana aad adiga u ogolaatid. Waxaa ka mid ah inaad Tallaabooyinka la qaadayo u sharaxdid, inta sheegayso inay wax tar u tahay horumarkiisa. Ilmaha meel dajintiisa, kaa soo ku lamaanan xoriyo ka qaadis lid ku ah amaba uu yahay mid ku xiran waxa uu ilmaha rabo, waxaa loo baahan yahay ogolaanshaha maxkamadda Qoyska.

   II. **Daryeelka raasumaalka** ilmaha masuulka laga yahay waxay ku faraysaa, inaad xoolahiisa si hufan u maamushid iyo inaad ka doonaysid inaad wax mushahar ah ka heshid ama lagaa siiyo.

   Marka aad xilkaasi qabanaysid waxaad Maxkamadda Qoyska u soo gudbisaa Liiska Xoolaha ilmaha Masuulka ka tahay uu leeyahay isagoo Tusmo ah waxaadna xaqiijisaa ama hubisaa inay waxaasi sax yihiin kaamilna ay yihiin. Hadday dhacdo in ilmahaasi xili dambe xoolo u soo kororto, waxaad ku kaamilaysaa liiskii horay u yiilay.

   Xoolaha ilmaha aad Masuulka ka tahay leeyahay ma isticmaali kartid. Waxaa kaloo laguu ogolayn inaad xoolaha ilmaha aad Masuulka ka tahay aad u bixisid hadiyo ahaan, hadduusan ahayn mid waajib ku ah anshaxa guud ama u dhiganta hufnaan la tixgalinayo.

   Lacagta ilmaha masuulka laga yahay, ee looga baahan yahay kharashaadkeeda (lacagta la siinayo), waa in lagu hayaa diyaar ahaan xisaabta akoonka bangiga. Lacagta ilmaha masuulka laga yahay ee aan loo baahnayn la kharash-gareeyo sida waa in lagu shubaa meel (lacag maalgashi) meeshaas oo bangi ku haboon ah lagana helayo lacag dulsaar ah (akoon maal-gashi). Bangigu waa inuu ka tirsan yahay nidaam dammaanad qaad ah oo ku filan maalgashiga labada dhinac. Nooc kasta oo kale oo maalgashi, oggolaanshaha maxkamadda qoyska ayaa loo baahan yahay. Waxaad u soo gudbisaa koonto maxkamada qoyska ee maamulka hantida ilmaha masuulka laga yahay iyada oo aan si gaar ah loo codsan inaad sidaas samayso, ilaa si kale loo cayimo, sanad walba ugu dambayn hal bil gudaheed dhamaadka sanad xisaabeedka. qaansheegtu waa in ay ka kooban tahay dakhli iyo kharash soo koobid habaysan; Rasiidhada boos kasto waa in lagu lifaaqaa.

Waxaa kugu waajib ah inaad Maxkamadda Qoyska markay ugu yar tahay sanadkiiba hal mar ku soo wargalisay xaaladaha shaqsiyadda ilmaha aad Masuulka ka tahay sidda yihiin.

b) Waxaad u baahan tahay dhowr xuquuq eed ku hawlgashid, oo aad ilmaha aad Masuulka ka tahay ka wareeysan kartid, kaasoo Maxkamadda Qoyska leh ogolaanshahooda, waxaa si gaar ah in la xuso mudan

1. in la diyaariyo waxii Ilmaha Masuulka laga yahay lagu hormarin lahaa,
2. Xuquuq hawleed ku saabsan Hantida sidda guri ama dhul ama xaq u yeelasho Hantideed, sidda wax Gadashadda ama wax iska gadista hanti Dhuleed iyo in la duldhigo amaahyo ama Xuquuqyo kale
3. in lagu heli karo Hantidda gabi ahaantii ama lagu heli karo qaab dhaxal ah ama wuxuu qayb ahaan u yeelan doono mustaqbalka dhaxal ahaan,
4. iska dhaaftid ama diidista Dhaxasha ama Dhaxaltooyo ama ku saabsan Qandaraas dhaxal qaybsi ah,
5. eebsi ku saabsan, iska dagid, samayn ama ka noqosho ganacsi ama meel la iibsan lahaa.
6. ku saabsan Kiro – ama Heshiis Kiro, ama Qandaraas kaleba, kaa soo ilmaha masuulka laga yahay had iyo jeer inuu wax bixiyo ku qasbanaanayo, hadduu Xaaladda Qandaraaskaasi ka badan yahay 1 Sanno, markuu qaan gaar noqdo ilmaha Masuulka laga yahay ka dib uu sii socondoono ay tahay
7. ku saabsan Qandaraaska Xirfad barasho ah, kaa soo dhamayntiisa uusan ka yareen halsano, ay macquul tahay
8. Dayn aan kor fuul lahayn oo loo qaado Ilmaha Masuulka laga yahay
9. ku saabsan dammaand u qaadid ama dammiin ka noqotid
10. Hadday ku saabsan tahay wax lays Isbarbar dhigayo ama heshiis Xalinta Khilaafaadka, waa hadduusan waxa laysku haysto uusan ka badnayn 6.000,00 Euro. (Kani ma dhaqan galayo, hadduu yahay isbarbar dhigo qoraal ama qaab diiiwaangalin ah oo ay Maxkamadda u soo saartay talo bixin isbaarbar dhiga ah u dhigma).

Sidda halkan laysku daba dhigay ma aha mid kaamil ah. Hadduu shaki ku galo fadlan waaxaad Macluumaad ka soo qaadataa Maxkamadda. Qandaraas, kaa soo la galay isagoo loo helin ogolaanshahii loo baahnaa, wuxuu marka hore noqonayaa mid aan shaqaynaynin. Waa inaad marka hore aad Maxkamadda Qoyska ka heshaa ogolaansho, siddaana loogu wargaliyaa qofka (rag ama Dumar) qandaraaska lala galayo.. Kuma filna inuu qofkaasi xogtaa ka helo qof seddexaad in ogolaansho loo baahan yahay. Adiga waa inaad ka go’aan qaadataa, inuu qandaraaskaasi uu ansax ku yahay marka ogolaanshahiisa la helo. **Gooni** u galista xuquuq hawleed, kaa soo u baahan Ogolaansho, wuxuu dhaqan gal noqonayaa **in marka hore** ogolaansho loo helo

c) Fadlan waxaad isla markiiba Maxkamadda iyo xafiiska Dhalinyaraddaba ku soo wargalisaa mar walbo adiga ama ilmaha aad Masuulka ka tahay cinwaankiinu wax iska bedelaan

d) Maxkamadda Qoyska waxay samaysaa Kormeer ku saabsan hawlgaladaadii oo dhan, arintaana waxaa ka caawiya Xafiiska Dhalinyaradda waxanna wakhti walba kaa codsan kartaa inaad ka warbixisid sidda hawsha laguu idmaday u qabatid iyo sidda uu yahay

xaaladiina adiga iyo ilmaha aad Masuulka ka tahay. Xafiiska Dhalinyaradda iyo – haddii loo baahdo – Maxkamadda Qoyska waxay kaala talinayaan wax alaaliyo wixii ku tacluuqda hawsha laguu idmaday, su'aalo hadaad ka qabtid

Qofkii isagoo Masuul ilmo ka ah u dhaawoco waajibaadkiisii, wuxuu masuul ka yahay wax alaaliyo wixii dhib ah ee ilmahaa uu masuulka ka yahay soo gaaro. Khatarta waxaad ka geli kartaa Caymis, macluumaad intaa dhaafsiisan haddaad u baahatid waxaad ka helaysaa Maxkamadda Qoyska

e) Xilka ku saaran wuxuu dhamaanayaa, marka uu ilmaha qaan gaar noqodo, ama lagu ruqseeyo. Waxaa lagugu ruqsayn karaa markuu jiro codsi oo asbaabo muhiim ah leeyihiin ama hadday jirto inay sii wadista arinta laguu idmaday ay danta ilmaha aad Masuulka ka tahay wax u dhimayso ama qatar galinayso.